

Operation Encompass waa qorshe qaran oo si wadajir ah uga wada shaqeeya dugsiyada iyo dhammaan ciidamada booliska.

“ Carruurta ku nool guryaha ay ka jirto xadgudubka qoyska, ama la kulma xadgudubka qoyska xiriirkooda dhalinyaranimo, si xun ayay u saameyn kartaa khibradan. ”

“ Waxaan xaqiijinnay in xubin ka mid ah shaqaalahayaga, (Hogaamiyaha Badbaadinta loo Magacaabey) ee loo yaqaan Qof Weyn oo Muhiim ah, la baray habraacyada Operation Encompass. Arintani waxay noo ogolaanaysaa in aan isticmaalno macluumaadka uu booliisku noola wadaagay si qarsoodi ah, si aan u fahanno sida xadgudubka qoysku ilmaha u saameeyay, ka dibna aan u fidinno taageerada ilmaha/carruurta aan daryeelno. ”

“ Macluumaadkan macnihiisu waa in aanu fahmi karno ilmaha hab-dhaqankiisa, oo aanu ilmahaas ka taageerno wax kasta oo laga yaabo inay u baahan yihiin ama ay rabaan. ”

“ Ilmaha la kulma xadgudubka qoyska waxaa qaarkood loo aqoonsanayaa dhibanayaasha xadgudubka qoyska, iyada oo aan dhinac kaleba laga eegayn¹ ”

“ Operation Encompass macnihiisu waa in dugsigayaga loo sheegi doono, ka hor inta aan la bilaabin maalinta dugsigaa ee ku xigta, marka booliisku ay ka qaybgalaan dhacdo xadgudub qoys ah oo uu jiro ilmo ama qof dhallinyaro ah oo dhigta dugsigayaga kaas oo ah mid ka mid ah kuwa ku lugta leh dhacdada ”

“ Waxaan aad u daneeyneynaa inaan siino taageerada ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah dhammaan ardaydayada waxaana aaminsanahay in ka mid noqoshada Operation Encompass ay naga caawineyso inaan arintan sameyno. ”

¹ Sharciga Xadgudubka Qoyska 2021